MINISTERO DELL'INTERNO

Co-funded by the European Union

Ilaalinta caalamiga ah: Waa maxay, sideese u shaqeysa.

# Tilmaame caruurta shisheeye ee aan lala socon.

## 1. Muxuu ka hadlayaa qoraalkan?

Qoraalkan waxaa ku uruursan warbixino muhiim u ah dadka sidaada oo kale da'doodu ka yartahay 18 sanno oo aan qaan gaarka aheyn, rabana in ay Itaaliya ka codsadaan ***ilaalin caalami ah***. Caruurta Itaaliya joogta oo dhan ma dalban karaan codsigaan, maxaa yeelay cunug walba waxa uu leeyahay qiso u gaar ah. La hadal ***tutor*** kaaga (Mas'uulkaaga), wadajir waxaad ku heli kartaan xalka adiga kugu haboon.



**Waa kuma *tutor* kaaga?**

Waa qof qaan gaar ah oo adiga mas'uul kaa ah, kaana caawini doona jidkii aad u mari laheyd joogistaada Talyaaniga. Garsooraha ayaa soo magacaabaya haddii waalidkaa uusan awood u laheyn in uu ku daryeelo. Magacabistan waxay qaadan kartaa waqti, muddadaas waxaa xilkaan sii haynaya madaxa xarunta aad ku nooshahay. Isaga ayaad kala hadli kartaa go'aanada muhiimka ah ee ku quseeya, kalana go'aansan kartaa haddii aad dalbaneyso iyo haddi kale codsiga ilaalinta caalimiga ah.

## 2. Waa maxay ilaalinta caalamiga ah?

Waa badbaadada ay Itaaliya kuu fidin karto, haddii waddankaaga uusan awoodin ama uusan rabin inuu ku badbaadiyo. Haddii aad cabsi ka qabto in naftaada halis gasho haddaad waddankaaga ku noqoto, sida dagaalo ka jira, xasilooni darro ama xuquuqdaada oo aan la tixgalineyn, kala hadal tutor kaaga ama kalkaaliyaha sharciga , weydiina warbixino ku saabsan arrimahaas iyo in aad codsan karto ***ilaalinta caalamiga*** ah iyo in kale.

**Howl wadeenada xarunta:** muddada aad ku sugan tahay xarunta, waxaa kula socon doona shaqaale howshoodu tahay in ay ku daryeelaan kuwaas oo isugu jira khubaro kala duwan sida qareen, dhakhtar, aqoon yahan cilmi nafsiga, kalkaaliye arrimaha bulshada, iyaga oo la socon doona arrimaahaga.
**Tarjubaanka xarunta:** goobta aad degan tahay waxaa joogi doona tarjubaan kaa caawini doona sidii aad ula hadli laheyd dadka, adigoo isticmaalaya luuqad aad fahmeysid.

Haddii aadan rabin ama aadan awoodin in aad ku laabato waddankaaga, cabsi aad ka qabto mid ka mid ah sababahaan soo socda awgood, markaas waxaad heli kartaa ilaalinta caalamiga ah


**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagu dilo**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in qof dhibaato kuu geysto**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in waalidkaa lagaa fogeeyo**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagugu suubiyo xad gudub galmo**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagu gumeysto**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagugu qasbo in aad ku kacdo fal aadan raali ka aheyn inaad suubiso**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagugu qasbo in aad ku biirto kooxo hubeysan ama lagaa dhigo milatari**



**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagugu qasbo in aad jirkaaga ka ganacsato**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in qasab lagugu guuriyo qof aadan rabin**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagu gudo**


**Waxaad cabsi ka qabtaa in lagula dagaalamo ama lagu cunsuriyeeyo, sida aad tahay ama hab dhaqankaaga awgood**

**Xusuuso: waxaad kala tashan kartaa tutor kaaga, haddii dariiqaan uu yahay xulka adiga kugu wanaagsan. La aqriso qoraalkan tutor kaaga!**

Hadda oo aad ku sugan tahay goob amaan ah, naso, soo celi tabartaadi una isticmaal muddadaan in aad muujiso shucurtaada, waa wax caadi ah oo aad ku nafisi doonto.

Waxaad la hadli kartaa qof qaangaar ah oo aad ku kalsaantahay - howl wadeenada ,tutor kaaga,xataa macallinkaaga ama qof aad adiga kalsooni ku qabtid. Haddi aadan awoodin ama aadan rabin in aad hadasho isku day, in aad qortid ama ku muujisid sawir gacmeed waxa aad ka fakareysid.

Barashada luuqadda talyaaniga waxa ay kaa caawini kartaa in aad la dhaqanto dadka kale iyo in aad suubiso waxyaalo ku madaddaaliya.

## 3. Sidee u codsan karaa ilaalinta caalamiga ah ?

Ka dib markii aad kala tashatay tutor kaaga haddii codsashada ilaalinta caalamiga ay tahay mid adiga kugu haboon,waxaa diyaarineysaa codsigaaga. Ogow in ay lama huraan tahay in aad runta u sheegto dadka arrintaan kaala socon doona, kuwaas oo ku qasban, ineysan arrimahaaga kala hadlin dad kale, haddii aadan adigu raali ka aheyn.

Shaqaalaha xarunta iyo tutor kaaga waxa ay kaala socon doonaan arrimaha quseeya kiiskaaga.

### Codsiga

Dalabka codsiga ilaalinta caalamiga ah, waxaa lagama maarmaan ah in la tago xarunta ciidamada booliska, **Xarunta dhexe ee booliska.**

Si loo fahmo qisadaada, waxaa lagu weydiin doono su'aalo badan oo quseeya taariikhdaada, qoyskaaga, safarkii aad ku timid talyaaniga. Jawaabahaad dhiibi doonto waxaa lagu qori doonaa foom la yiraahdo C3, taas oo suurta galineysa in la fahmo xalka adiga kugu haboon. Xusuuso, si loo helo xalkaas, waxaa lagama maar maan ah wada shaqeyntaada.

Dabcan laga bilaabo waqtigan, waa muhiim in aad tilmaanto, sababaha aad uga cabsi qabto in aad ku noqoto waddankaaga. Sidaas darteed waa muhiim in aad diyaarisid qoraal ka hadlaaya taariikhdaada (ama weydii qof inuu kaa caawiyo diyaarinta qoraalka), soona raaci warqadahaaga aqoonsiga (haddii aad leedahay)




**Ciidamada booliska:** Marka laga reebo howshooda ah baaritaanka iyo sugidda ammaanka Talyaaniga dhexdiisa. Bileyska waxa ay xaqiijiyaan aqoonsiga dadka, waxa ay ku leeyihiin qeyb muhiim ah dhanka codsiga ilaalinta caalamiga ah, waxa ay dhiibaan ***ogolaanshaha joogista.***

Waxaa ku raaci doona tutor kaaga, wuxuuna kaa caawini doonaa buuxinta foomka C3,waxaa kaloo joogi doona tarjubaanka ciidamada booliska, kaasoo kaaga tarjumi doona luuqad aad taqaanid. Haddi ay da'daadu ka weyntahay tahay 14 sanno, waxaa lagaa qaadi doonaa faro.

## Qaraabo ma ku leedahay wadan kale oo ku yaala Yurub?



Haddii aad ku leedahay qoys ama ehel wadan kale oo yurub ah, waxaa jira sharci, nidaamka dublin, oo kaa caawini kara, in aad si hubaal ah oo sharciga waafaqsan aad ugu tagi karto qaraaba-daada. Haddii aad rabto in aad la joogto iyaga, kala hadal tutor kaaga iyo howl wadeenka sharciga, si loo fahmo in nidaamkan uu ku quseeyo iyo in kale. Runtii mar marka qaarkood, dublin wuxuu kuu ogolaanayaa inaad ka wareegto Itaaliya oo aad u guurto wadan kale oo ku yaala yurub, xataa

## Baarista codsiga ilaalinta caalamiga ah

Ka dib markii xarunta bileyska aad u gubdiso coodsigaaga,waxaa halkaas ka bilaabmaya baaris lagu suubinayo codsigaaga.Sidaas darteed waa muhiim in aad gacan ka geysato.

Waxaa laguugu soo yeeri doonaa wareysi. Ogow in ey qaadan doonto waqti ku kula duwanaan doona goobaha. Weydii howlwadeenada xarunta muddo intee le'eg ayaad sugi doontaa

Dadka ku dhageysan doona waxay ka tirsan yihiin ***Guddiga Xuduuda ee Aqoonsiga Ilaalinta Caalamiga ah***.

Muddada aad sugeysid wareysiga, waa muhiim in aad kala tashato qisadaada howl wadeenada xarunta iyo tutor kaaga, si ay u soo if baxaan macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira taariikhdaada. Haddii aadan horey u qorin taariikhdii aad soo martay, qor hadda, waxay kaa caawineysaa in aad xusuusato wixii ku soo maray, Guddigana waxay ka caawineysaa inay si wanaagsan u fahmaan codsigaaga magan galyo. Haka gaabsan in marxaladaan xataa lagaa caawiyo

Guddiga xuduuda wuxuu ka kooban yahay 4 qof oo isla dejin doona go'aanka. Hal qof oo Guddiga ka mid ahoo keliya ayaa ku dhageysan doona. Haddii aad is leedahay waxaa haboon iney kuligood ku dhageystan, kala hadal tutor kaaga.

## *Wareysiga*

Inta aad wareysiga ku jirto waxa aad sharaxi doontaa adoo si fiican u faah faahinaya taariikhdaada. Waa muhiim in aad ka hadasho qoyskaaga, noloshaadii intii aad wadankaaga joogtey, safarkii aad Talyaaniga ku timid, sababtii aad wadankaaga uga soo tagtay iyo gaar ahaan sababta aad ku diideyso ama aadan u awoodin in aad dib ugu laabato. Haddii aad tahay gabar aadna u qabto in nooca aad tahay uu kuu soo jiidayo halis gaar ah, ha ka gaabsan in aad sheegto. Haddii aad is leedahay waxaa jira wax yaabo kale oo muhiim ah, sheeg inta uu wareysiga socdo adoo si xor ah u hadlaaya.

Waa muhiim in aad ogaato in qofka ku dhageysanaya uu u baahan yahay in uu si wanaagsan u fahmo qisadaada, sidaas darteed wuxuu ku weydiin doona su'aalo badan, taasoo kaa caawineysa in dhinac walba laga sal gaaro qisadaada.

Haddii su'aalaha qaarkood aadan fahmin, sheeg, codsana in su'aashii laguugu soo cesho. Haddii aad damacdo in aad in yar nasato, codso.

Isku day in aad si wanaagsan warka u caddeeyso. Adiga si fiican ayaad u taqaanaa xaaladii aad ka timid, si cad oo tifaf tiran u micnee, sababtoo ah waa muhiim intuu wareysigu socdo in wax walba ay soo shaac baxaan.

Waxaa suurta gal ah iney kugu adkaato ka hadalka waqtiyo xannuun leh oo ku soo maray, laakiin midaan waa jidkii loo maraayey go'aanka kama dambeysta ah.

Haddii ay jiraan wax yaalo aadan dooneyn in aad ka hadasho, sheeg.

Intuu wareysigu socdo waxaa joogi doona tarjubaan kaa caawini doona inaad kuwa kale kula hadashid, luuqad aad garaneysid.

Tarjubaanka wuxuu si sax ah u tarjumayaa wareysigaaga, mana ka qeyb qaadanayo go'aanka. Inta lagu gudo jiro wareysiga, haddi aad u maleyso in tarjubaanka uusan si sax ah u fasirin waxa aad ku hadleyso, u sheeg xubinta ka tirsan Guddiga iyo tutor kaaga, kaasoo kula joogi doona inta uu wareysigu socdo.

Xusuuso inta wareysigu lagu gudo jiro, marka laga reebo tutor kaaga, tarjubaanka iyo xubinta Guddiga, waxaa kaloo kula joogi kara haddii aad raali ka tahay, khubaro kala duwan sida (kalkaaliye arrimaha bulshada, qareen iyo aqoon yahan cilmi nafsiga) kuwaas oo joogistoodu ay kaa caawineyso in aad si wanaagsan wax u qeexdo. Haddii aad tahay gabar waxaad codsan kartaa waa haddii ay suurto gal tahaye, in ey warsiga kaa qaado qof haween ah.

Warka lagu hadlay waxaa laga suubinayaa **qoraal**, kaasoo tarjubaanku mar kale kuu aqrin doono. Marka uu wareysigu dhamaado, waxaa lagu weydiin doonaa in aad qoraalka saxiixdo si aad u ansixiso in wixii aad sheegtay iyo qoraalka ay is waafaqsan yihiin. Haddii aad wax fahmi weydo ama shaki kaa galo in aad tiri iyo in kale, ha ka gaabsan inaad sheegto.



***Wareysade:*** Waa xubin ka mid ah Guddiga ku dhageysan doona, marka uu ku dhageysto ka dib waxa uu u sharaxi doonaa qisadaada xubnaha kale ee ka tirsan Guddiga, iyaga oo si wadajir ah u gaari doona go'aanka.

***Tarjubaan:*** Kama tirsana xubnaha Guddiga, waa qof ku hadla luuqadaada kaana caawini doona wada hadalka inta aad wareysiga ku jirto.

***Shaqaalaha taageerada:*** Waa qof awood u leh in uu ku taageero inta uu wareysigu socdo, haddii loo baahdo, adiga ayaa codsan karo in uu kula joogo iyo in kale.

## *Go'aanka:*

Guddiga xuduuda wuxuu go'aaminayaa ilaalinta ku haboon xaaladdaada. Waxa jira saddex nooc oo ilaalin ah, taasoo ku xiran hadba wixii aad ka soo baxsatay ama ha ahaado dagaal ama arrimo gaar ah oo shaqsiyadeed. Wax ka weydii kalkaaliyaha sharciga si aad u hesho war bixino dheeraad ah. Guddiga waxa kale oo uu go'aansan karaa in uusan kuu aqoonsan wax ilaalo ah. Xusuuso, si kastaba ha ahaate in aad racfaan qaadan kartid, haddii go'aanka Guddiga uu diidmo yahay ama aad is leedahay ma helin ilaalintii aad fileysay. Kala hadal tutor kaaga iyo kalkaaliyaha sharciga si aad u ogaato in fursadan ay tahay xal kugu haboon.

## 4. Gaargaar iyo cinwaano xiriir

Hadii aad rabto in aad meel mariso xuquuq daada ama aad ka cabsi qabto in la qadarin waayo, kala hadal qof qaan gaar ah oo aad ku kalsoon tahay, sida tutor kaaga.

Kalkaaliyaha sharciga waa qofka aad ka tilmaan qaadaneyso arrimaha ku saabsan kiiskaaga gaarka ah.

UNHCR The UN Refugee Agency

This project has been funded with support from the European Commission. This publication reflects the views only of the author, and the European Commission cannot be held responsible for any use which may be made of the information contained therein.